

# War Saxaafadeed

## Waaxda Biyaha ee Portland iyo Waaxda Adeegyada Bii'ada

**Shaacin Degdeg ah**

Juun 17, 2021

**Xariirada:**

Sarkaalka Xogta Dadwaynaha ee Waaxda Biyaha ee Portland: 503-823-8064

Sarkaalka Xogta Dadwaynaha ee Sarkaalka Adeegyada Bii'ada: 503-823-1138

## Waaxda Adeegyada guryaha ee Portland Ayaa U diyaar Garoobay Koloriin Yarida ka jirta Xeebta Galbeed

Waaxda Adeegyada Bii'ada ee Portland iyo Biyaha ayaa diyaar u ah inay sii wadaan adeegyada Muhiimka ah xili ay kala go'day badeecooyinka koloriinta taasoo saamaysay Xeebta Galbeed taasoo saamayn karta biyaha la cabo ee gobalka iyo daawaynta biyaha la isticmaalay. Si aad u hesho xogta gobalka oo dhan, booqo [WEBPAGE](#). Wixii xog dheeraad a oo ku saabsan biyaha la cabo ee Portland, Fadlan booqo [portland.gov/water/chlorine-shortage](http://portland.gov/water/chlorine-shortage).

Labadaba shirkadaha adeegyada Biyaha la cabbo ee Magaalada (PWB) iyo bulaacada (BES) waxay haystaan agab ku filan oo u diyaarsan ama ku filan inay adeegyada sii daboolaan dhawrka asbuuc ee soo socda. Ayadoo laga eegaayo xogta ugu danbaysa ee la heli karo, mudadaan ayaa loo arkaa inay ku filan tahay in shirkada koloriintu dib u biloowdo soo saarida maadada.

"Biyaha la cabo ee Portland wali waa kuwo badqab leh. Wabiyada Willamette iyo Columbia ayaa wali amaan u ah in lagu dabaasho laguna raaxaysto," ayuu sheegay Gudoomiyaha Waaxda Adeegyada Bii'ada iyo Biyaha Mingus Mapps. "Waxaan la shaqaynaynaa iskaashatada heer dawlad gobaleed iyo kuwa gobalka si aan u maarayno koloriin yaridaan ka jirta Xeebta Galbeed. Waxaa iga go'an inaan idinla socodsiiyo talaabo kasta oon horay u qaadnaba."

**Waxaan doonaynaa inaan markale adkayno: Biyaha Portland wali waa kuwo badqab u leh in la cabo** Waxaan hadda haysanaa koloriin nagu filan si aan u daawayno biyaheena dhawrka asbuuc ee soo socda.

Waxa Laamaha Adeegyada Guriga ee Portland ay samaynayaan

Nagu xirmoow!	<a href="http://portlandoregon.gov/water">Oonleen ahaan barta portlandoregon.gov/water</a>	<a href="https://www.facebook.com/portlandwaterbureau">Barta Facebook @portlandwaterbureau</a>	<a href="https://twitter.com/portlandwater">@portlandwater</a>	<a href="https://www.instagram.com/portlandwaterbureau">Barta Instagram @portlandwaterbureau</a>	<a href="mailto:portlandoregon.gov/water/emailnews">Barteena Wararka Oonleena ah oo ah portlandoregon.gov/water/emailnews</a>
---------------	--	--	--	--	---

**Fadlan nalasoo xariir si aad u hesho turjumaad ama fasiraad, ama hawl fududaynta dadka naafada ah.**

More Information · Más información · Дополнительная информация · Thêm thông tin · 欲了解更多信息 · Mai multe informații · Macluumaad dheeri ah

Подробици · Tichikin Poraus · अधिक सूचना

[portlandoregon.gov/water/access](http://portlandoregon.gov/water/access) · 503-823-8064 (Adeegga dadka dhagoolka ah: 711)

**Waaxda biyuhu** waxay leeyihiin dookhyo badan, ayna ku jiraan isbadallada shaqada iyo suuragalnimada soo kicinta biyaha dhulka, si looga fogaado in adeegyadu kala go'aan. Biyaha dhulka ayaa leh koloriintooda u gaarka ah taasoo ku filan biyaha jumlada ah, haddii loo baahdo. Waxaan yaraynay cadadka koloriinta aan isticmaalno oon ka dhignay 1.8 mg/L, taasoo ku filan inay biyaha daawayso heer amaan ah buuxinaysana shuruudaha daawaynta. Waxaan aqoonsanaynaa shaqooyinka ikhtiyaariga ah ee la joojin karo si muhiimada loo siiyo biyaha dadku cabayaan.

"Laanta Biyaha ee Portland waxay la shaqaynaysaa iskaashtada gobalka oo dhan si loo helo xalka maaraynta koloriin yarida saamaynta ku yeelanaysa qaybo badan oo Xeebta Galbeed ah," ayuu sheegay Agaasimaha Laanta Biyaha ee Portland Gabriel Solmer. "Waxaan nasiib u yeelanay inaan lahaano isha kale ee biyaha la cabo, oo tayo sare leh oon ka helayno Xarunta Ceelkeena Cirifka Koonfureed ee wabiga Columbia. Waxaan xog jooqto ah idin ka siin doonaa marka xog dheeraad ah soo baxdo maalmaha soo socda.

**Adeegyada Bii'ada** ayaa sii wada inay daaweeyaan wax ka badan 70 milyan oo galaan oo biyaha wasaqda ah maalintii ayna biyaha nadiifta ah ku siidaayaan Wabiga Columbia ayagoo soo maraaya warshada ugu wayn ee magaalada ee daawaynta biyaha wasaqda ah ee Columbia Boulevard iyo wabigga Willamette oo ka yimaada Warshada Yar ee Biyaha Wasaqda ah Daawaysa ee Tryon Creek oo ku taala cirifka Lake Oswego. Koloriin ah nooca sodium hypochlorite ayaa loo adeegsadaa jeermis dilaha ugu danbeeya ee daawaynta biyaha wasaqda ah. Biyaha la nadiifyo ayaa kadib laga saaraa koloriinta kahor intaan lagu fasixin wabiyada.

"Waxaan sii wadnaa inaan nadiifino biyaha wasaqda ah wax saamayn ahna hadda kuma dhacayaan midkoodna wabiyada Willamette ama Columbia. Labadaba wabiyada Portland ayaa ah kuwo nadiif ah oo badqab u leh in lagu dalxiiso dadka ayaana daawan kara biyo tijaabinteenaa asbuuclaha ah ee Wabiga Willamette ayagoo galaaya [portland.gov/check-the-rec](http://portland.gov/check-the-rec)." ayuu yiri agaasimaha Adeegyada Bii'ada Mike Jordan. "Shaqaalaheena daawaynta biyaha wasaqda ah ayaa ka kormara xeerarka aan u dajinay aad ayaana arintaas ugu faraxsan nahay. Waxaan isku dubaridaynaa shaqaalaheena si aan u aragno sida aan u balaarin karno shaqooyinkeena si aan biyo nadiif ah ugu shubno wabiyada anagoo haddana ilaalinayna agabka daawayn."

Waxaan wax ku dhisaynaa iskaashiyadeena xooga badan ee aan la samayno iskaashatadeena maxaliga ah, kuwa dawlad gabooleedka iyo gobalka si aan qaab wanaagsan oo maskaxaysan uga falcelino dhacdadadaan taagan/koloriin yaraanta. Waxaan iskaashiyo furan la leenahay khabarada caafimaadka dadwaynaha, adeeg bixiyaasha biyaha ee heer gobal iyo maareeyaasha xaaladaha degdega ah ee gobalka oo dhan. Si wadajir ah, waxaan u diyaar garoownaa xaalado kaladuwan, ayna ku jiraan yaraanta kiimikada biyaha lagu daaweeyo. Waxaan si degdeg ah uga shaqaysiin karnaa heshiisyada taageerada labada dhinac ah ee u dhaxaysa iskaashadaha adeegyada guriga, sida Shabakada Biyaha ee Oregon/Gurmadka Wakaalada Biyaha Wasaqda ah (ORWARN), haddii loo baahdo. Waxaan wadaagnaa xog cusub oo ay isdhaafsadaan adeegyada guriga iyo khayraadka laga faa'iidayaan karo laguna hago meesha loogu baahi badan yahay. Waxaan sidoo kale iskaashi la samaynaynaa iskaashatada laamaha guud ee magaalada si ay nooga caawiyaan shaqooyinkooda adeegsiga biyaha ee aan baahida wayn loo qabin.

## Waxa aad samayn karto

Portland waxay leedahay hanaanka qoto dheer oo biyaha lagu kaydiyo. Waxaan nasiib u helnay inaan lahaano ilo biyood oo balaaran oo dadka reer Portland u isticmaalaan si caqliyaysan waxaana idin ka codsanaynaa inaad sidaas kusii wadaan.

Si aad u hesho xog faahfaahsan oo ku aadan noocyada badan ee ciladaha saamaynaaya bulshadeena, iska diiwaan geli adeegga PublicAlerts ee barta PublicAlerts.org.

### **Sida aan U diyaar Garoowno**

Waxaan si taxadar leh u maal gelinaa hormarinnada nidaamka biyaha kuwaas oo noo diyaarsha xaaladaha degdega ah. Sabab la xariirta qorshaynta taxadarka badan, Laanta Biyaha ee Portland waxay leedahay labo ilood oo biyo tayo sare leh laga helo kuwaas oo la isticmaali karo marka xaalad degdeg ah timaado. Maal gelinta biyaheena dhulka hoostiisa, Xarunta Ceelka Cirifka Koonfureed ee wabiga Columbia, ayaa noo sahlaaya inaan maamulno nidaamka biyaha qaab noo sahlaaya inaan buuxino baahiyaha biyaha la cabo ee dadka reer Portland. Waxaan adeegsan doonaa casharada aan ka baranay koloriin yariaan oon ku dabiqi doono xarunteena biyaha Jumlada U sifaysa si aan u yarayno khataraha tan lamidka ah.

Waxaan diyaar u nahay hufnaan: waan idiin warami doonaa markaan xog cusub helno aana go'aamino talaabooyinka xigga.

### **Xog ku saabsan Laanta Adeegyada Bii'ada ee Portland**

Laanta Adeegyada Bii'ada ee Magaalada Portland - xarunta sifaysa bulaacada iyo biyaha daadka magaalada - waxay dadka Portland siisaa barnaamijyo si loo difaaco tayada biyaha iyo caafimaadka dadwaynaha, ayna ku jiraan aruurinta iyo daawaynta bulaacada, dhisida marinnada bulaacada iyo ilaalintooda, maaraynta biyaha daadka, iyo kaydinta biyaha togoga iyo barkadaha. Nalagala soco barta Twitter - @BESPortland iyo [portlandoregon.gov/environmental\\_services](http://portlandoregon.gov/environmental_services).

### **Xog ku saabsan Laanta Biyaha ee Portland**

Laanta Biyaha ee Portland waxay biyo siisaa ku dhawaad hal milyan oo dad ah oo ku dhaqan aaga Portland. Nidaamka biyaha ee Portland waxaa ku jira labo kamid ah ilaha biyaha ee tayada badan, 53 taangi iyo barkadood, iyo 2,200 oo mayl tuubooyin taxan. Ayadoo leh 600 oo shaqaale ah oo ka shaqeeya waxkasta laga bilaabo daawayn biyaha ilaa adeegga macaamiisha, Laanta Biyuhu waxay u taagan tahay inay biyo nadiif ah bixiso daqiiqad kasta maalin kasta.